# Tilmaamaha Booqashada

*LA CUSBOONEYSIIYAY SIMBTEEMBAR 2022*

**BOOQDEYAASHU WAA INAY:**

- Xirtaan maaskaro dhammaan mudada ay joogaan.
- Waa inay tagaan Miiska Soo dhawaynta si looga baaro COVID-19 ayna u qaataan astaanta magaca sawirka leh. Booqdeyaasha waxaa laga codsan doonaa aqoonsi sawir leh.
- Waa inay caafimaad qabaan—aysan dareemeyn qandho, qufac ama qaboow, ama astaamaha fayraska caloosha ayna la nool yihiin dad ayaguna caafimaad qaba. Booqdeyaashu waxay ayagoo aan ogeyn faafin karaan jeermisyada haddii qof gurigooda ku nool xanuunsan yahay.
- Waa inay si joogto ah u farxashaan, gaar ahaana kahor iyo kadib marka ay booqdaan bukaanka.

## Baraarujin gaar ah oo la xariirta shaybaarka COVID-19

Baaritaanka ayay heli karaan dhammaan booqdeyaasha loo ogolaado waxaana muhiimada lagu saari doonaa dadka leh astaamaha ama la joogay qof laga helay caabuqa COVID-19. Booqdeyaasha loo ogolaaday ee ay suurtagalka tahay inay leeyihiin astaamaha caabuqa ayaan loo ogolaan doonin inay booqdaan bukaan jiifka. Qof kasta oo laga helo COVID-19 waxaa laga dooneyaa inuu isku keli yeelo guriga ugu yaraan 5 maalmood mana booqan karo inta lagu jiro waqtiga.

## Booqashooyinka Bukaan Jiifka

**Saacadaha Booqashada**: 8:30 am – 8:30 pm

**Waxaa lagaa codsan doonaa inaad qorto liiska magacyada dadka soo booqan kara cunugaaa intuu isbitaalka kujiro. Keliya dadka liiska ku jira ayaa booqan kara.**

**Yaa booqan kara?**

- Labo qof oo taageerada aasaasiga ah bixiya (badanaa waalidiinta) kuwaasoo haysta ogolaanshaha booqdaha 24/7.
- Walaalaha ama carruurta bukaanka dadka waawayn ah (ayna ku jiraan kuwa isla dhashay, ilmaha waalidku wada korsaday ama ilmaha xaaska waalidka) ee ku nool guriga bukaanka. Way u imaan karaan bukaanka inta lagu jiro saacadaha booqashada.
- Ilaa afar booqde oo dheeraad ah. Way u imaan karaan bukaanka inta lagu jiro saacadaha booqashada. Qof wayn waa inuu la socdaa booqdeyaasha aan qaan-gaarin xili kasta.

Ehelka iyo saaxiibada kale ayaa taageeradooda kusoo gudbin kara oonleenka. Ilaa afar qof ayaa markiiba geli karta qolka bukaanka, hal kamid ah booqdeyaashaasna waa inuu yahay qof wayn.

Haddii xaalada qoyskaagu isbadesho ama aad dhibaato ku qabto helitaanka iyo bixinta taageerada cunugaaga, codso caawimaada Shaqaalaha Bulshada. Marka ay jiraan cilado dhanka qoyska ah/masuliyada ilmaha, Shaqaalaha Bulshada ayaa kala shaqayn kara qoysaska xaqiijinta booqasho loo siman yahay.

Qorsheyaasha hurdada ee booqdeyaasha taageerada bixiya 24/7 ayaa kaladuwan qaybaha kaladuwan. Qolalka waxaa yaala hal sariir oo la duubo oo deeqda ugu yaraan hal qof. Lama ogola in qof dhulka seexdo, maadaama tani abuurayso khatar ku dhaqda adiga, ilmahaaga iyo shaqaalaheena. Si lagaaga caawiyo diyaarinta meel aad seexato oo ka baxsan isbitaalka, kala xariir Concierge Services lambarkaan 513-636-5009 ama laynka bilaashka ah ee 888-894-1374.

## Booqashooyinka Bukaan Socodka

*(Booqashooyinka Waaxda Xaalada Degdega ah (Emergency), Daryeelka Degdega ah (Urgent Care), Rugta Caafimaadka (Clinic), Qaliinka Maalintii (Day Surgery), Baaritaanka (Testing Visits))*

**Ilaa labo qof ayaa la joogi kara ilmahaaga. Dadkaan waxaa ku jira waalidiinta, masuuliyiinta, xaaska iyo lamaanahaaga jacaylka. Booqdeyaasha ka yar 18 laguma talinaayo.**

Cincinnati Children's wuxuu ku dhaqmaa sharciyada khuseeya dadkana ma takooro ama ulama dhaqmo si gaar ah asagoo cuskanaaya isir, midab, wadanka qofka kasoo jeedo, asalka, diinta, da'da, jinsiga, dookha galmada, xaalada guurka, naafada, ama sababaha kale ee sharci darada ah.

ATENCIÓN: si habla español, tiene a su disposición servicios gratuitos de asistencia lingüística (interpretación y traducción). Llame al 1-513-517-4652.

注意：如果您使用中文，您可以免費獲得語言援助服務。請致電 1-513-517-0662。

# Xuquuqdaada iyo Waajibaadkaaga

## Bukaannada iyo waalidiinta/xubnaha qoyska ayaa xaq u leh:

- In qof ehelkood ah ama wakiil aad dooratay iyo dhakhtarkaaga loo sheego isla markaba marka isbitaalka lagu dhigo;
- Si loo daaweeyo si xushmad iyo qadarin badan ayadoo aan loo eegayn isirkooda, midabkooda, caqiidada, asalka, wadanka, muwaadinimada, diinta, da'da, xogta guud, naafada jirka ama dhimirka, xaalada guurka ama qoyska, jinsiga uurka, dookha galmada, aqoonsiga/dareenka jinsiga, ciidanka, soo maray ciidanka, ama xaalada ciidanka naafada ah, ama xaalad kale oo la difaacaayo sida ku cad sharciyada iyo xeerarka quseeya ee federaalka, gobalka, ama maxaliga ah;
- Inaad ogaato macyada dhakhaatiirta iyo kalkaalisooyinka ku daryeelaaya Cincinnati Children's iyo doorka ay ciyaarayaan;
- Inuu kuu sheego dhakhtarku, kuuguna sheego erayo aad fahmayso, xanuunka, daawada iyo jaanisyadaada bogsashada;
- Inaad hesho xogta ugu badan ee aad u baahan tahay si aad u oggolaato ama u diido daawayn kasta oo laguusoo jeedsho;
- Inaad door muuqda ka qaadato go'aannada daryeelka caafimaadka, ayna ku jirto abuurista iyo dhaqan gelinta qorshaha daryeelka, taasoo ay ku jirto maaraynta xanuunka sida ku haboon;
- Inaad go'aan faahfaahsan ka gaarto daryeelka ayna ku jirto, ilaa heerka sharcigu ogol yahay, diidmada daryeelka;
- Ilaalinta sirta daryeelka iyo daawaynta caafimaad; tan waxaa ku jira xaqa aad u leedahay in laguu sheego sababta shaqsiyaadka aan door toos ah ku lahayn daryeelka ay u joogaan marka lagu daawaynaayo ama doodaha iyo sirta gaarka ah guud ahaan;
- Inaad hesho daryeel lagugu siiyo goob amaan ah, oo ka caagan dhammaan xadgudubka, dhibaataynt ama ciqaab wadareed;
- Inaan lagugu samayn jajuub ama xirxirid loo adeegsaday in lagugu qasbo, lagugu edbiyo, lagaaga aargoosto ama masaalix kale; in lagu siiyo shaqaale tababaran oo si badqab leh u dhaqan gasha jajuubka ama xirista la ogol yahay;
- In la qariyo xogta dhammaan xariirada iyo diiwaannada daryeelka lagugu siiyay Cincinnati Children's; inaad hesho xogta ku jirta diiwaanka caafimaadka waqti cayiman oo macquul ah gudihiis;
- Inaad ka warqabto laguuna sheego haddii Cincinnati Children's ay aaminsan yihiin in talaabo sharci qasab tahay in la qaado si loo sameeyo daawaynta;
- Inaad hesho sharaxaada qeexan oo la xariirta natiijada daawooyin kasta ama qaliino natiijooyinku aad uga duwan yihiin natiijooyinkii la filaayay;
- Inaad jawaab u hesho codsi kasta oo macquul ah si lagaaga caawiyo buuxinta baahiyaha gaarka ah;
- Inaad codsato caawimaad lagaa siiyo qorsheynta isbitaal ka saarida;
- Inaad xulato inaad cunugaaga ka saarto ama ka baxdo isbitaalka xataa marka dhakhaatiirtu ay kuu sheegaan inaadan sidaas yeelin, ilaa heerka sharcigu saamaxaayo; waxaa lagaa doonayaa inaad saxiixdo foom ka saamaxaaya Cincinnati Children's masuuliyada faya qabka adiga ama cunugaaga;
- Inaad ka warqabto xariiro kasta oo dhex mara Cincinnati Children's iyo xarumaha kale, ilaa iyo inta ay qusayso daryeelka adiga ama cunugaaga;
- Inaad aqbasho ama diido ka qaybgalka mashruuc kasta oo cilmi baaris ah;
- Inaad ogaato baahiyaha daryeelka caafimaadka joogtada ah ee loo baahan yahay kadib marka lagaa saaro isbitaalka ama adeegga bukaan socodka;
- Inaad oggaato qarashaadka adeegyada la bixiyay, si loo qiimeeyo biilasha daryeelkaaga caafimaadka iyo si aad u hesho sharaxaada qarashaadka.

## Bukaannada iyo waalidiinta/xubnaha qoyska ayaa masuul ka ah:

- Inaad bixiso, ilaa inta aad ka warqabto, xog sax ah oo dhamaystiran oo ku saabsan dhammaan xaaladaha caafimaadka la xariira;
- Inaad dejiso dardaaranka hore aadna filato in shaqaalaha isbitaalka iyo dhakhaatiirta daryeelka bixinaaya ku dhaqmaan dardaarankaan ilaa heerka sharcigu fasaxaayo;
- Inaad tixgeliso bukaannada kale iyo shaqaalaha iyo inaad ku booriso dadka kusoo booqanaaya inay qadarin muujiyaan ayaguna;
- Inaad dhiibto qarashka adeegyada isbitaalka iyo bukaan socodka ee lagu siiyay, inaad keento xogta muhiimka u ah ka shaqaynta sheegashooyinka caymiska iyo/ama si aad u qorsheyso bixinta qarashaadka caafimaadka sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah;
- Inaad kala hadashola taliye dhanka dhaqaalaha ah suurtagalnimada caawimaad dhaqaale inaad hesho si aad ugu bixiso qarashaadka isbitaalka iyo bukaan socodka marka aad qabto dhibaato dhaqaale (la xariir la taliyaheena dhaqaalaha oo aad ka wacayso 513-636-0201);
- Inaad raacdo qorshaha daawaynta ee uu ku taliyay dhakhtarku adiguna aad aqbashay;
- Inaad raacdo xeerarka iyo habraacyada Cincinnati Children's ee la xariira daryeelka iyo anshaxa bukaanka;
- Inaad ka raadiso xog, ilaa heerka suurtagalka ah, dhakhaatiirta adoo waydiinaaya su'aalo kasta oo muhiim u ah gaarista fahan ku aadan dhibaato caafimaad ama qorshe daawayn oo uu abuuray adiga ama dhakhtarku.

**Haddii aad qabto tabasho ama cabasho aysan si degdeg ah u xalin karin kooxdaada daryeelku, waxaad la xariiri kartaa:**

Our Family Relations Department (Waaxdeena Xariirada Qoyska) oo laga helaayo 513-636-4700 ama advocates@cchmc.org

Ohio Department of Health (Waaxd Caafimaadka ee Ohio) oo laga helaayo 1-800-342-0553 ama hccomplaints@odh.ohio.gov; Khabiirta U doodista iyo Difaaca Macaamiisha ee Ohio Mental Health and Addiction Services (Adeegyada Caafimaadka Dhimirka iyo Maandooriyaha ee Ohio) 1-877-275-6364; Disability Rights Ohio (Xuquuaha Naafada ee Ohio) 200 Civic Center Drive, Suite 300, Columbus, OH 43215 614-466-7264 ama 1-800-282-9181

Joint Commission (Guddiga Isku dhafka ah) oo aad ka helayso www.jointcommission.org (waxaa lagu heli karaa Ingiriis oo kaliya)

Dadka hela adeegyada Medicare ayaa xaq u leh inay codsadaan dib u eegis lagu sameeyo cabashooyinkooda. Bukaannada Medicare ka leh ayaa codsigaan ku diri kara Waaxda Xariirada Qoyska ama ayagoo wacaaya Laynka Caawimaada Dadka hela Adeegyada Medicare oo laga helaayo 1-855-408-8557 (OH ama IN), 1-844-430-9504 (KY) ama www.keproqio.com (waxaa lagu heli karaa Ingiriis oo kaliya).



BRV711697 1022 003500